**XEER SHARCI DEJIN 7 DISEEMBAR 1966, L.6**
**Canshuurta Moorka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY qodobka 62 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Xeer sharciyeedka 9 Sibteembar 1965, n. 14, oo loo bedelay sharci 21 Nofeembar 1965, n.19, oo u wakiishay Xukuumadda in ay soo saarto shuruucda la xiriirta Canshuurta Moorka;

Kadib SOO JEEDINTA Wasiirka Lacagta;

MARKUU DHAGEYSTAY Golaha Wasiirrada;

**WUXUU XEERIYEY**:

## CINWAANKA 1AAD
Qawaaniin Guud

### Qod. 1
### Dhulka Canshuurtu Ka Dhaqangaleyso

Canshuurta moorka waxaa la dhaqangelinayaa haddii saameynteedu ka dhacayso dhulka Jamhuuriyadda.

### Qod. 2
### Gundhigga Canshuurta Moorka

1. Gundhigga Canshuurta moorka ee qoraallada ku tilmaaman qodobka 6 waa jiritaanka iyo isticmaalka qoraalladaas.
2. Gundhigga Canshuurta moorka ee qoraallada ku tilmaaman qodobka 7 waa wareejinta hantida ama haysashada badeeco, caddad lacageed, saami amaaheed ama saamiyo amase dhaqdhaqaajinta badeeco, saami amaaheed ama saamiyo, laga qaaday dhulka Qaranka oo loo qaaday dibedda ama dibedda laga keenay.

### Qod. 3
### Qofka ay ku waajibtay Canshuurta Moorka

1. Qofka bixinaaya canshuurta jaango'an waa qof shaqsi ah ama qof qaanuuni ah, dawladeed ama khaas ah, oo sameeya, soosaara, codsada ama isticmaala qoraallada ku tilmaaman qodabka 6 ee xeerkaan.
2. Qofka ay ku waajibtay canshuurta culaabtiran ka ah (proporzionale), waa deynqabaha lagu leeyahay deyn lacageed ama iibsadaha badeecadda, saami amaaheed ama saamiyada la xiriira qoraallada ku tilmaaman qodobka 7 ee xeerkaan.
3. Marka lala macaamilaayo Qaranka, qofka ay ku waajibtay canshuurtu, si kasta oo uu u jiro heshiis lid ku ah, waa dhinaca kale.

**Qod. 4**
**Nooca Canshuurta**

1. Canshuuraha moorku waa kuwo jaango'an iyo culaabtiran ah.
2. Canshuurta jaango'an waxay ku waajibeysaa, si hal cabbir ah, qoraallada iyo waraaqaha nooc cayiman, ayadoo loo eegaayo noocooda waxayna ku waajibeysaa, sida caadiga ah, xaashi walba.
3. Canshuurta culaabtiran ka ah waxay ku qiyaasan tahay, si tiro boqolley joogto ah, qiimaha uu joogo shayga canshuurtu ku waajibtay.

**Qod. 5**
**Qaabka Bixinta Canshuurta**

1. Canshuurta moorka waxaa loo bixinayaa, sida nooc kasta ugu tilmaaman qodobbada soo socda:
   a) Si caadi ah, ayadoo la isticmaalaayo warqad khaas ah oo leh farshaxan astaameysan oo mooreysan, si waafaqsan qodobka 11;
   b) Si aan caadi ahayn, ayadoo la isticmaalayo canshuur moor ama shaabad xaqiijin;
   c) Si matalan, ayadoo caddadka canshuurta laga bixinaayo xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga ama xafiis kale oo si sharci ah loo siiyey awood canshhur qabasho.
2. Wasaaradda Lacagta waxay ogolaan kartaa in canshuurta loo bixiyo si matalan, si waafaqsan qawaaniin loo sameeyey hadba xaaladdii taagan.

**Qod. 6**
**Shayga iyo Qaybta Canshuurta Jaango'an**

Dhammaan qoraalada hoos ku tilmaaman waxaa ku waajibay canshuurta moorka, ayadoo la raacaayo qaybta hoos ku tilmaaman iyo hababka bixinta canshuurta ee qodobka hore tilmaamay.

**1. Qoraallo Madani ah:**

   a) Qoraallo guud, asal ama nuqullo, oo ay qoreen notaayo ama sarkaal dawladeed oo loo fasaxay in uu u yeelo aaminid guud, iyo sidoo kale dokumentiyo, qoraallo waraaqo iyo naqshado ku lifaaqan qoraalladaas;
   b) Qoraallo khaas ah, asal ama nuqullo, hal dhinacleyaal, labadhinacleyaal ama dhinacyo badan ah, oo ay ka ratibmayaan sameynta, wax ka bedelka, baabi'inta, wareejinta ama aqoonsashada xuquuqo nooc kasta iyo cayn kasta oo ay yihiin, oo ay ku jiraan foojarka rarka iyo warqadda rarka;
   c) Nuqullo iyo qaybo, asal ama nuqullo, qoraallo, saami amaaheed, warqado, dokumentiyo, diiwaanno, buugaag ama dokumentiyo la mid ah, uu bixiyey, xaqiijiyey, ama caddeeyey sarkaal dawladeed kastaa;
   d) Caddeyn alaab dhigasho (fede di deposito), rasiid iyo amar la bixid badeeco oo la xiriira maqaasiinta guud iyo maqaasiinadda kaydka aagga canshuurta ka madaxbanaan; asal iyo nuqullo;
   e) Qoraallo la xiriira qaansheegasho kambiyaale, asal iyo nuqullo, nuqul rasmi kambiyaale iyo kuwii kale oo macno ganacsi leh, waa haddii ay si dhameystiran u waafaqsan yihiin kuwii asalka ahaa ama nuqul ay ku caddahay bixinta canshuurta culaabtiran ee qodobka xigaa ku xusan;
   f) Rasiidyada aan caadiga ahayn si waafaqsan faqrada 4 ee qodobka 16:

— Xaashi mooreysan ama canshuur moor: xaashi walba waa Sh.So 5.

2. **Qoraalo Maamuleed:**
   a) Arjiyo,codsiyo, dacwado iyo faahfaahinta la xiriirta oo ku socda, si ka baxsan garsoorka, maamul xubin Qaran ah ama maamulada Dawladda Hoose:
   — Canshuur moor: xaashi walba Sh. S 3.
   b) Shahaadooyin, caddeymo qoraal ah, bayaanno, gundhigyo qoraal, caddeyn markhaati iyo dhaar leh, shatiyo, ogolaansho, leysin, asal ama nuqullo, laga bixiyey xafiisyo dawladda dhexe ama maamulka dawladha house amaba hay'ado dawladeed oo ay shaqadoodu tahay kaydinta diiwaannada guud:
   — Xaashi mooreysan ama canshuur moor: xaashi walba waa Sh.So 5.
3. **Qoraalo Xubnaha Garsoorka la Horkeeno**:
   a) Qoraallo iyo go'aano garsoor oo nooc madani ama maamul nooc kastaba oo ay yihiin, ay soo saareen ama bixiyeen xubnaha garsoorka, xataa arrimaha garsoorka iskhilaaf la'aanta ah (volontaria giurisdizione), iyo qoraalada iyo go'aamada dacwadaha arbitaraalka ah (arbitrage process);
   b) Dokumentiyo, shahaadooyin, diiwaanno, xisaabo banki (bank accounts), boosto, qaybo iyo qoraal kasta nooc walba iyo cayn kasta oo uu yahay oo ka soo baxay dacwado madani ah ama maamul ah oo ay ka mid yihiin nuqullada iyo qoraalada dhinacyada dacwada;
   c) Qoraallo codsi bixin ganaax cafis xukunka ka hor (oblazione) iyo bixinta ganaax maamuleed;
   d) Shahaadooyin iyo qoraalo, ku soo baxay si ka baxsan garsoorka, oo la xiriira arrimo madani, maamuleed ama ciqaabeed, oo ay bixiyeen hay'adaha garsoorka, kalkaaliyaha garsoorka, waraaqa geeyaha iyo kalkaaliyayaasha kale ee garsoorka:
   — Xaashi mooreysan ama canshuur moor: xaashi walba waa Sh.So 5.
4. **Qoraalo Ka Yimid Dibedda:**
   Qoraallo dibedda ka yimid, oo ka mid ah noocyada lagu tilmaamay qodobka hore. Waa in markaas qoraalada la canshuuro muddo 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la soo geliyey qoraallada dhulka Qaranka:
   — Canshuur moor: xaashi walba Sh. S 3.
5. **Caddeyn Soo Gelid iyo Dhoofid (Manifesto):**
   a) Caddeyn soo gelid iyo dhoofid maraakiibta motoorka ku dhaqaaqa
   — Canshuur moor ama moor matalan Shs. So. 100.
   b) Caddeynta soo gelida iyo dhoofidda gaadiid kale oo badmaax oo ay ku jiraan doomaha matoorka ku dhaqaaqa:
   — Canshuur moor ama moor matalan Shs. So. 100.
6. **Diiwaan uruuriyaha iyo Buug Joornalada:**
   a) Diiwaan uruuriyaha, ay sida sharcigu qabo xafidaan nootaaydu ama saraakiil kale oo dawladeed:
   — ShaaCanshuur moor : xaashi walba Shs. So. 5.
   b) Buug joornaaleed, si waafaqsan qodobka 20 ee xeerkaan:
   — Canshuur moor: 100 xaashiyood am aka yar 100 xaashiyood Shs. So. 5.

## Qod. 7
## Shayga iyo Qaybta (aliquota) Canshuurta Culaabtiran

1. Shayga qaybta canshuurta nooca culaabtiran (proporzionale), oo ah 0,50%, oo lagu

dhaqangelinaayo, hadba nooca qoraalku yahay, moorka ama xaashida mooreysan ee kambiyaalaha, waa mid ku waajibaya qoraaladda hoose:

a) Biil, xisaab, amar lacag bixin, rasiidyo caadi ah, si waafaqsan Qodobka 16 iyo dokumentiyo la mid ah, xataa haddii aysan saxiixnayn;
b) Kambiyaale ama xawilaad kambiyaale, iyo wixii kale oo saamiyo ganacsi ah, si kasta oo ay tahay wakhtiga ay dhacayaan saami amaaheedyadaas, laga bixiyey ama laga qaadan karo dhulka Jamhuuriyadda;
c) Caddeyn curaar dalab raashin marka ay ka soocan tahay caddeynta alaab dhigasho, si kafaalo bixin amaah lacageed, amah saamiyo kale oo lakala wareegsan karo oo la xiriira caddad lacag ah;
d) Jeegag banki iyo jeegag wareega oo lagu bixiyey si aan waafaqsaneyn xeer sharci dejin 09/12/1965 lambar 2, sabab la xiriirta kayd la'aan ama xisaabta jeeg bixiyaha oo maran, ama in ay jirto caddeyn in jeega la bixiyey 4 maalin ka hor taariikhda runta ah ee la bixiyey.

2. Qoraalada ku tilmaaman faqradaha kore, oo dibedda ka soo galay, waa in la marsiiyo canshuurta moorka muddo 15 maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta la soo geliyey dhulka Jamhuuriyadda.

3. Canshuurta moorka ee nooca culaabtiranka ah ee ku waajibtay qoraalada faqradaha kore ku tilmaaman, caddeynta canshuur bixinta, haddii caddeyntaasi ay ku qoran tahay isla saami amaaheedka ama, wareejinta jeega, kafaalada iyo wixii kale oo bayaan kambiyale ah.

4. Marka la dhaqangelinaayo qaybta canshuurta culaabtiranka ah, tirada jajabka ah waxaa lagu buuxinayaa boqolka u dhow.

**Qod. 8**
**Turubka**

1. Canshuurta moorka waxay, sidoo kale, ku waajibtay turubka lagu cayaaro oo baaca cabbirkiisu ka koreeyo 32x45mm, canshuur ah Shs.S 5 kurjadiiba.

2. Canshuurta waxaa loo bixinayaa si aan caadi ahayn, ayadoo moorka la saaraayo yakaha hadhiinka (asso di cuori) markii uu yahay turub nooca faransiiska, ama yake kale haddii turubku nooc kale yahay.

3. Lacagta waxaa lagu qabanayaa xafiisyada furdada marka alaabta la soo dejinaayo, ama xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga.

**Qod. 9**
**Canshuur Dhaafid Shakhsi**

1. Marka la reebo amarka faqrada 3aad ee qodobka 3, Qaranka waa laga dhaafay dhamaan canshuuraha moorka ee la xiriirta qoraalada ku tilmaaman qodobka 6 iyo 7 ee loo sameeyey, loo soosaaray, loo dalbaday ama loo isticmaalay danta khaaska ah ee hawlahiisa siyaasadeed, sharcidejin, maamul iyo garsoor.

2. Hay'adaha danta guud (enti pubblici) waa ay ka baxsan yihiin canshuur dhaafidda ku tilmaaman faqrada kore.

**Qod. 10**
**Canshuur Dhaafid Shay**

1. Waxaa canshuurta moorka laga dhaafay:
   a) Qoraallada iyo heshiisyada la xiriira maareynta Hay'adda Caymiska Daryeelka Bulshada, si waafaqsan Xeer Sharci 30/06/1960, lambar 3, oo loo beddelay Sharci 13/01/1961, lambar 2;
   b) Qoraallada iyo heshiisyada la xiriira fulinta shaqooyinka ay maalgeliyeen Dawlado shisheeye ama Ururo Dawli ah si waafaqsan Sharci 14/06/1962, lambar 18;
   c) Qoraallada iyo heshiisyada la xiriira maareynta Shirkadda Somali Airlines si waafaqsan Sharci 28/12/1963, lambar 30;
   d) Qoraallada iyo heshiisyada la xiriira maareynta hay'adaha gargaarka tabarucaadka oo si sharci ah loo aqoonsaday, oo aan lahayn ujeedo macaash;
   e) Canshuur dhaafidda qodobkaanku tilmaaman kuma jiraan qoraallada la horgeeyo Hay'adaha Garsoorka, sida ku xusan faqrada 3aad qodobka 6.

**CINWAANKA 2AAD**
Canshuur Baaris Canshuur Qaadis

**Cutubka 1aad**
Habka Saarista Canshuurta Moorka

**Qod. 11**
**Astaamaha Xaashida Mooreysan (carta bollata)**

1. Xaashida mooreysan waxay leedahay farshaxan qalinshub waxaana, mid kasta, ku xardhan qiimaha tirada canshuur moorka xaashi walba, dhererka waa 307mm, balacana waa 425mm; waxayna u xariiqan tahay si jiif ah iyo si taagan si weji kasta ay uga muuqdaan 25 xariiqood, waxayna ku leedahay dhinaca midig daraf rubuc ah, dhinaca bidixna daraf sideed meelood meel ah.
2. Xaashida mooreysan ee kambiyaalaha iyo arrimaha kale ee ganacsiga dhererkeedu waa 105mm balaceeduna waa 250mm.
3. Qaabka, qiimaha iyo astaamaha kale ee xaashida mooreysan (carta bollata), xaashida kambiyaalaha iyo moorka (marche da bollo) waxaa lagu cayimayaa Xeer Wasiirka Lacagta.

**Qod. 12**
**Tilmaamo iyo Mamnuucyo la Xiriira Xaashida Mooreysan**

1. Xaashida mooreysan laguma qori karo in ka baxsan darafyada iyo xariiqimaha dariiqooda. Xariiq walbaa ma qaadi karto wax ka badan 28 xaraf, marka laga reebo kusii dhameystirka xarfaha dhexdooda ee meelaha banaana ee isla xaashida.
2. Dokumentiyada iyo qoraalada ka soo baxay madbacad, litogaraafiya ama aalado la mid ah oo isticmaala daabacaad makaanik ah, waa la ogol yahay, si ka baxsan mabnuuca faqrada kore, in wax lagu qoro banaanka darafyada, laakiin waa in aan la dhaafin 28 xaraf ee xariiq walba iyo 100 xariiqood xaashi kasta.
3. Waa la ogolyahay in darafyada xaashida lagu qoro lambarro iyo faahfaahinno lagu tilmaamay sharuucda ama xeernidaamiyeyaal.

4. Waxaa si adag mabnuuc u ah:
   a) In wax lagu qoro iyo in moorka ama walax shaabadeed kale la dul saaro moorka xaashida mooreysan;
   b) In la isticmaalo nooc kasta oo xaashi mooreysan oo ay ka muuqato doorsoomid moor, farshaxanka moorka ama cabbirradeeda;
   c) In lagu qoro isla xaashida mooreysan, ha ahaado asalka ama nuqulka, labo ama ka badan oo qoraallo kala duwan ah.

**Qod. 13**
**Fulin Ahaanshaha Amaahda Kambiyaalaha**

1. Kambiyaalaha iyo xawilaada kambiyaalaha, oo ay ka mid yihiin kuwa aragti ku bixinta iyo kuwa aragti ku bixinta wakhtiyeysan, iyo sidoo kale jeega kambiyaalaha, ma ay lahaanayaan fulin diyaar ah haddii uusan si sharci u saarneyn moorka.
2. Sitaha (il portatore) ama haystaha (il possessore) ma awoodi karo in uu sheegto xuquuqo la xiriira amaah kambiyaale haddii uusan bixin canshuurta moorka ee ku waajibtay iyo ganaaxa maamul ee la xiriira.
3. Awood fulin la'aanta amah saamiyeedka waa in ay sheegaan kuna mudacaan garsoorayaalku xataa si waajib xafiis ah. Khaladka bixin la'aanta canshuurta moorka wuxuu ka qaadayaa kambiyaalaha kartida fulinta oo kaliya, waxse u dhimi maayo dhamaan xuquuqihii kambiyaalaha ee la xiriiray amaah saamiga, kuwaas oo situhu sheegan karo kadib marka uu iska habeeyo waajibaadka canshuuraha ee amaah saamigaas.
4. Kambiyaaluhu waa in uu ku sifoobaa tilmaamaha sharciga ee canshuurta moorka, ee jira wakhtiga loo geynaayo qaataha (prenditore).

**Qod. 14**
**Saarista Canshuurta Moorka iyo Caddeynta Canshuurta Moorka**

1. Saarista canshuurta moorka, marka ay tahay si aan caadi ahayn, waa in ay ka horeysaa saxiix kasta, xataa haddii uu tirtiran yahay ama bedelan yahay; diiwaannada, diiwaannada guud iyo buug xisaabeedka, saarista canshuurta moorka waa in ay ka horeysaa xisaab kasta.
2. Saarista iyo tirtirista canshuurta moorka waxaa laga fulinayaa xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga, ama waxaa fulinaaya isla bixiya canshuurta. Saarista caddeynta bixinta canshuurta moorka waxaa fulinaaya xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga ee ay arrimahaas u xilsaartey Wasaaradda Lacagta.
3. Saarista iyo tirtirista canshuuraha moorka waa in la fuliyaa ayadoo la raacaayo habraaca soo socda:
   a) Canshuurta moorka ee uu tirtiray xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga waxaa la saari karaa qayb kasta oo xaashida ah, waana in la tirtiro ayadoo la isticmaalaayo timbaraha xafiiska eel eh taariikh. Diiwaannada rasiidka isku lamaan leh (madre e figlia) waa in la saaro moorka xaashida meel u dhaw xariiqda kala qaybisa labada rasiid, si tirtirista qayb ka mid ah uga muuqato rasiidka yar (figlia) iyo rasiidka weyn (madre).
   b) Canshuurta moorka ee ay shakhsiyaad ka tirtireen dokumentiyada iyo qoraalada saxiixan waa in mar kasta la saaraa dhamaadka dokumentiga ama qoraalka waana in lagu tirtiro isla saxiixa saaran dokumentiga, ayadoo la isticmaalayo qalin qad leh ama qalin qori aan tirtirmin, oo qayb saaran tahay moorka qaybna xaashida. Haddii dokumentiga ama qoraalku

uusan saxiixneyn, canshuurta moorka waxaa la saari karaa qayb kasta oo xaashida ka mid ah, waxaana lagu tirtirayaa ayadoo lagu qoraayo taariikhda, ama la duleelinaayo ama shaabad qad culus leh ama qad aan la tirtiri karin, waxaana la saarayaa qayb xaashida ka mid ah iyo qayb moorka ka mid ah.

4. Dokumentiyada iyo qoraalada ka kooban xaashi in kabadan, oo mid kastaaba ay ku waajibtay canshuur, moorka waa in la saaro bilowga bogga koowaad ee xaashi walba, marka laga reebo xaashida u dambeysa oo moorka la saaraayo dhamaadka dokumentiga ama qoraalka waxaana loo tirtirayaa habka ku tilmaaman faqrada hore ee xigta.

5. Marka qoraalku ka soo baxay xafiis dawlad dhexe, gobol, degmo, ama ayaga hortooda lagu sameeyey, moorka waxaa la saari karaa meel kasta oo xaashida ah waxaana lagu tirtiri karaa xataa timbaraha xafiiskaas taariikh la'aan.

## Qod. 15
## Mamnuucyo La Xiriira Isticmaalka Moorka

1. Moorka korkiisa waxba laguma qori karo, haddii aysan ahayn tirtiris waafaqsan sida iyo habka sharcigu tilmaamay.
2. Waxaa si aan ka hadal lahayn mamnuuc u ah:
   a) In la tirtiro, ayadoo loo kala jeexayo kalabar, canshuurta moorka ee la saaray diiwaannada rasiidka isku lamaan leh (matrice e figlia);
   b) In la saaro canshuur moor aan dhameystirneyn ama uu ka muuqdo raad in horey loo isticmaalay;
   c) In la saaro iyo in la tirtiro canshuur moor meel ama si ka duwan sida sharcigu tilmamay;
   d) In la tirtiro canshuur moorka ayada oo aan taariikhda tirtirista lagu fidinta xaashida, si ka baxsan isla canshhur moorka.

## Qod. 16
## Rasiidyo Caadi ah iyo Rasiidyo aan Caadi Ahayn

1. Sida ay tahay ujeeddada xeerkaan waxaa loo aqoonsan yahay rasiid caadi ah caddeyn kasta oo qoraal ah, xataa haddii ay u qoron tahay si daraf qor ah ama qoraal shaabad ah ama xataa aysan saxiixneyn, qoraalkaas oo loo sameeyey si fasixid guud ama qaar ah, in la bixiyey qaan lacageed, ama caddeyn kasta ama qirasho loo sameeyey lacago la bixiyey, si kasta oo ay ku waajibta, laguna bixiyey si lacag ah ama qaab kale oo lacag bixin u dhigma.

2. Waxaa ah, sidoo kale, rasiidyo caadi ah faa'iido, kiro, ijaar, kiro iyo wixii la mid ah; rasiidyada la xiriira kambiyaalooyin iyo wixii kale oo saamiyo ganacsi ah; liisaska lacagbixinta ama dokumenti kale oo la mid ah oo xisaabeed, xataa haddii aysan saxiixneyn, si loogu qaato faa'iidooyin saami iyo dulsaarrada amaah shirkadeedyada (obbligazioni societarie); waraaqaha xisaabta mushaarka la siiyo qofkii xaq u leh marka la bixinaayo mushaarka ama, haddii aysan jirin, liiska ama buuggaagta mushaar bixinta xataa haddii aysan saxiixneyn ama caddeynta in la bixiyey waraaqaha xisaabta mushaarka ama liis lacagbixin.

3. Marka ay tahay ruqsad wadareed lacagbixin (mandato collettivo), liisas lacag bixin, buugaag lacagbixin ama dokumentiyo kale ee la mid ah, canshuurta caddeynta lacag bixinta waxay ku waajib tahay caddadka lacagta la siiyey amah-laha (creditore).

4. Waxaa loo aqoonsan yahay rasiidyo aan caadi ahayn rasiidyada ay ka ratibanto caddeyn bixin

qaan (obbligazione) la xiriirta heshiisyo hore oo qoran ayna tahay in lagu diiwaangeliyo wakhti go’an ama la xiriira go’aan hay’ado garsoor iyo sidoo kale rasiidyo saamiyo iyo raasumaal, oo la sameeyey kadib fulinta waajibaad heshiis magdhow (compensazione).

## Cutubka 2aad

Waajibaadyo Canshuureed

### Qod. 17
### Qaansheegto

1. Dhammaan kala iibsiga badeecooyinka ee dhexmarta ganacsatada, warshadleyda iyo ganacsatada macaamilka hore (esercenti) waa in ay ku sugan yihiin dokumenti loogu taloggalay oo qoraal ah, oo ay ku qoran tahay qiimaha iibka iyo wixii kale oo si ku haboon u tilmaami kara mid mid arrimaha dhaqaale.
2. Dokumentigaasi waa in uu soo diyaariyaa iibiyaha ama qofka ay dhiniciisa lacagta u dhacday.
3. Waxaa ka fasaxan waajibaadkaas ganacsatada, wixii la xiriirta dhaqaalaha ka soo gala iibka tafaariiqda ah.
4. Qaansheegtooyinka, lagu sameeyey si waafaqsan faqradaha kore, waa in loo lambareeyo si isku xigta oo taariikheysan, seddex maalin gudahood laga bilaabo maalinta la sameeyey ama la qabtay.
5. Lambareyntu waa in ay ahaato mid sannad qorraxeed.

### Qod.18
### Qaansheegad Isku-qorid (Autofattura)

1. Haddii iibsaduhu uusan ku helin qaansheegtada, ku tilmaaman qodobka 17, labaatan maalin gudahood, waa in uu qorto qaansheegto leh isla astaamaha, tilmaamaha iyo nuxur lagu aqoonsan karo iswaydaarsiga dhaqaale.
2. Iibsaduhu waa in uu dukumentigaas marsiiyo nidaamka canshuurta moorka, maadaama uu bedel u yahay, xagga xeerkaan, dokumentiga asalka ah.

### Qod. 19
### Ganacsi Aan Joogto Ahayn

Markii ay tahay waajibaadka rasiidqorista, arrimaha ganacsi ee aan joogtada ahayn xataa haddii ay dhexmareen dad aan ganacsato ahayn, waxaa loo aqoonsan yahay kala iibsi badeeco hoos imaanaya waajibaadka rasiidqorista si waafaqsan qodobka 17.

### Qod. 20
### Buug Joornaal

1. Ganacsadaha ku hawlgala dhadhaqaaq ganacsi ama warshadeed ay tahay in la helo oggolaansho darajada koowaad, labaad iyo seddexaad, ganacsadaha beeralayda ah iyo xirfadleyda waa in ay hayaan buug joornaal ay tahay in lagu muujiyo, maalin walba, dhammaan hawlgallada la xiriira dhaqdhaqaaqa ganacsiga ama midka xirfadda iyo gaar ahaan dhamaan wixii la soo qabtay iyo wixii baxay.

2. Inta aan la isticmaalin ka hor waa in buug joornaalka, cidda isticmaalaysaayi, u geyso xafiisyada canshuuraha dadban ee ganacsiga ama laanta canshuuraha ee gobolka ama, haddii aysan jirin, xafiisyada gudoomiyaha degmada ayagoo, si ka baxsan qaanuun kasta oo kale, uga lambareynaaya si isku xigta bog kasta, mooreynaayana xaashi kasta.
3. Waa in buug joornaalka loo hayaa si waafaqsan xisaabaad nidaamsan, aan lahayn meelo banana oo cad, aan la hayn sadardhaafyo, aan lahayn darafqor, aan hool hool lahayn. Wixii la tirtiraayo waa in loo sameeyaa si erayada la tirtirayo ay u ahaadaan wax la akhriyi karo.

**Qod. 21**
**Rasiidyo Khasab**

Ayadoo aan waxba loo dhimayn Xeerka Shaqada, shaqo bixiyayaashu waa in ay ku caddeeyaan bixinta mushaarka shaqaalahooda rasiid lacagbixin ama dokumenti kale oo u dhigma, waxaana la marsiinayaa canshuurta moorka sida uu faray qodobka 7 ee xeerkaan.

**Qod. 22**
**Suurogal la’aan Isticmaalka Canshuurta Moorka**

Xadgudub kuma ah xeerkaan haddii dokumentiga ay canshuurta moorka ka maqan tahay ama aysan dhameystirneyn, marka ay caddahay in maqnaanshada ama dhameystir la’aanta ay sababtay khaasatan in ay suuroobi weyday in la helo xaashida mooreysan iyo moorka oo loo baahnaa, bishardi in xaaladdaas laga dheehan karo dokumentiga midkaasna la geeyo, si loo marsiiyo nidaamka, xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga seddex maalin gudahood markii laga gudbey marxalada carqaladda abuurtey ee ku cad isla dokumentiga.

**Qod. 23**
**Dokumenti Horgeyn Dacwad Maxkamadeed ama Xafiisyo Dawladeed**

1. Dhamaan dokumentiyada iyo qoraalada nooc kastaba ah ee aan si kastaba soo buuxin shuruudaha xeerkaan lama horgeyn karo dacwooyinka maxkamadaha ama xafiisyada kale ee dawladda.
2. Marka sidaas ay tahay, canshuurta moorka waxay noqoneysa qiimaha ay joogto wakhtiga la geeyey.

**Cutubka 3aad**
Canshuur Uruurin Khasab Ah iyo Midnimo

**Qod. 24**
**Ganaax La Daahid Bixin Canshuur**

1. Marka canshuurta, ganaaxa iyo canshuurkororku uruurin u bisil yihiin oo ay dhaafto muddo 10 berri wakhtigii bixinta, waxaa ku waajibay ganaax la daahid bixin canshuur oo u dhigma 10% qiimaha lacagta ay tahay in la bixiyo.
2. Xafiisku wuxuu ikhtiyaar u leeyahay, sabab macquul ah darteed, in uu tirtiro dhamaan ama qayb ganaaxa la daahidda canshuur bixinta.

**Qod. 25**
**Canshuur Uruurin Khasab Ah**

Marka la dhaafay wakhtigii loo qabtay canshuurbiyaha daahsan in uu ku bixiyo canshuurta, xafiisku wuxuu ku qaadayaa canshuur uruurin khasab ah si waafaqsan qawaaniinta shuruucda mideysan (testo unico) ee canshuuraha tooska ah.

**Qod. 26**
**Mas'uuliyad Wadaag**

1. Dhamaan qaybaha saxiixa, qabta, ogolaada ama kala wareejiya dokumentiyo, qoraallo, kambiyaalayaal ama saamiyo kale oo lakala iibsan karo oo aan u nidaamsaneyn si waafaqsan qawaaniinta xeerkaan amase ku guuriya diiwaan ama ku magacaaba dukumentiyo ama qoraallo kale, waxay si masuuliyad wadaag ah uga jawaabayaan ku xadgudubka qawaaniinta xeerkaan.
2. Marka laga reebo kambiyaalayaasha iyo wixii kale oo saamiyo ganacsi ah, qaybta loo soo diray dokumenti ama qoraal aan u nidaamsaneyn si waafaqsan xeerkaan, oo aysan sameyntiisa ka qayb qaadan, waxay beri ka tahay wax walba oo masuuliyad la xiriirta xadgudubyada lagu kacay marka ay muddo 15 maalin gudahood ku geyso xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga si ay u sharciyeeyso waxayna bixineysaa kaliya canshuurta. Markii ay jirto marxaladdaas sarkaalka xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga wuxuu u furayaa gal xadgudub baaris oo quseeya kaliya amarjabiyayaasha.

**CINWAANKA 3AAD**
Ganaaxyo

**Cutubka 1aad**
Ku Xadgudubyo

**Qod. 27**
**Ka Dhuumasho Bixin Canshuurta Moorka**

1. Qof kasta oo diyaara dokumentiyo ama qoraallo asaga oo aan bixin canshuurta moorka ee jaango'an ama bixiya canshurta moorka oo aan dhameystirneyn, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul ka bilowda Sh.So. 50 ilaa Sh.So. 200 oo dokumenti kasta ah.
2. Qof kasta oo la dhuunta canshuurta moorka ee culaabtiran ka ah waxaa la saarayaa ganaax maamul ka bilowda 40 ilaa 120 jeer inta ay tahay canshuurta uu la dhuuntay.
3. Marka la ogolyahay in canshuurta loo bixiyo si matalan (virtuale) waxaa la dhaqangelinayaa:
   a) Markii ay tahay ka-gaabsi caddeyn canshuur bixin (omessa dichiarazione), canshuur dheeri la mid ah canshuurta aan la bixin;
   b) Caddeyn canshuur aan sax ahayn, canshuur dheeri ah oo la mid ah nus canshuurta aan la bixin;
4. Qof kasta oo la dhuunta canshuurta ku waajibtay turubka lagu cayaaro waxaa la saarayaa ganaax maamul oo ugu yaraan Sh.So.100 ilaa Sh.So. 400 kurjad kasta oo turub ah.

**Qod. 28**
**Ka-gaabsi Rasiidqoris (omessa fatturazione) ama Buug Joornaal Maqnaansho ama Nidaamsaneyn**

1. Qof kasta oo aan u hogaansamin amarrada wajibaadka rasiid qorista iyo rasiid-qorashada, sida ku tilmaaman qodobbada 17, 18 iyo 19, ama sameeya rasiidqoris ama rasiid qorasho aan dhameystirneyn, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul (omisiss).
2. Qof kasta oo aan u hogaansamin waajibaadka haynta buug joornaalka ku tilmaaman faqrada koowaad ee qodobka 20, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul oo ugu yaraan Sh.So.1,060 ilaa Sh.So 4,000.
3. Marka ay tahay xadgudubyo la xiriira lambareyn la'aanta qaansheegtooyinka baalasha buug joornaalka ama lambareyn aan dhameystirneyn, ganaax maamulku waa ugu yaraan Sh.So.300 ilaa Sh.So 1,200 sannad qorraxeed kasta ama nuskiis, haddii xadgudubku socdo weli, ama buug journal kasta oo aan si dhameystiran u lambareysneyn.
4. Qof kasta oo ay waajib ku tahay haynta buug joornaal ee aan ku qorin, maalin maalin, hawlaha la xiriira shaqada shirkadda ama xirfadda, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul ugu yaraan Sh.So.1,000 ilaa Sh.So. 4,000.

**Qod. 29**
**ku guuldaraysiga bixinta risiid khasab ah**

Qof kasta oo aan u hogaansamin amarrada waajibaadka bixinta iyo haynta rasiidka ku tilmaaman qodobka 2, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul ugu yaraan Sh.So.50 ilaa Sh.So.200 halkii dokumenti oo ay usii dheertahay ganaaxa ku tilmaaman faqrada labaad ee qodobka kore 27.

**Qod. 30**
**Ganaax Guud**

Qof kasta oo, wixii ka baxsan arrimaha ku tilmaaaman qodobada kore, aan u hogaansamin waajibaadyada, mamnuucyada ama amarrada xeerkaan, waxaa lagu qaadayaa ganaax maamul ugu yaraan Sh.So. 25 ilaa 100 halkii xadgudub.

**Qod. 31**
**Nidaameynta Dokumentiyada**

1. Dokumentiyada iyo qoraalada loo sameeyey si xadgudub ku ah canshuurta moorka, ganaaxa maamul ee ku tilmaaman qodobada kor ku xusan waxaa u sii dheer, in markasta ay ku waajibtey canshuurta moorka aan la bixin iyo dheeraadka, inta ay joogto wakhtiga barista xadgudubka.
2. Nidaameynta dokumentiyada iyo qoraalada aan waafaqsaneyn xeerkaan waxaa si khaas ah u fulinaaya xafiisyada ku shaqada leh ayagoo dokumentiga la nidaamiyey ku dul qoraaya caddadka ganaaxyada maul ee laga qaaday.

**Qod. 32**
**Been-abuurid, U ekeysiin (contraffazione) iyo Labojeer Isticmaal Canshuuraha Moorka**

Markii ay dhacdo beenabuurid, u ekeysiin, dhalanrogid ama labojeer isticmaal canshuur moor, waxaa sii dheer ciqaabaha ku tilmaaman Xeerka Ciqaabta, dhaqangelinta ganaaxa maamul ee ku tilmaaman qodobka 27 ee xeerkaan.

**Qod. 33**
**Ka Ganacsiga iyo Isticmaalka Canshuur Moor oo Horey Loo Isticmaalay**

Ciqaabaha ku degsan Xeerka Ciqaabta markii ay dhacdo beenabuurid, u ekeysiin ama dhalanrogid canshuur moor waxaa lagu qaadayaa qofka kasta oo haysta kana ganacsada ama isticmaala xaashi mooreysan, canshuur moor iyo wixii kale oo leh qiime mooreysan (valori bollati) oo horey loo isticmaalay.

**Cutubka 2aad**
Baarista Xadgudubyada

**Qod. 34**
**Dhaqangelinta Ganaaxyada**

Dhaqangelinta ganaaxyada waxaa nidaaminaaya Sharciga 01/08/1966, lambar 12 oo ku saabsan baarista iyo la dagaalanka xadgudubyada la xiriira shuruucda lacagta.

**Qod. 35**
**Qaybaha Baarista Xadgudubyada**

Baarista xadgudubyada ku tilmaaman xeerkaan waxaa u igman xafiisyada iyo ciidanka Booliska Canshuuraha (polizia tributaria) iyo saraakiisha Wasaaradda Lacagta leh dokumenti aqoonsi khaas ah iyo saraakiisha iyo shaqaalaha xafiisyada canshuuraha dadban ee ganacsiga, qaybaha canshuuraha ee gobolada, wixii ku eg bararitaanada ay ka sameeyeen fadhiyada xafiisyadooda iyo qaybahooda ee midkastaa qaabilsan yahay.

**Qod. 36**
**Waajibka soo bandhigista buugaagta iyo dokumentiyada**

1. Dhamaan shakhsiyaadka ay ku waajib tahay, sida ku cad qodobada 17, 18, 19, 20 iyo 21 ama qodobo kale ee sharciyeed ama xeernidaamiyeed, in ay hayaan buugaag ama diiwaanno leh canshuur moor ama ay tahay in ay kaydiyaan dokumentiyo canshuur moor ku waajibtay iyo dhamaan shakhsiyaad qofeedka ah ama shakhsiyaad qaanuuniga ah ee si kastaba ku jira hawl wax soosaar, ganacsi ama xirfadeed, waa in ay soo bandhigaan, markii ay sidaas dalbadaan qaybaha ku shaqada leh, buugaagta, diiwaannada, dokumentiyada iyo qoraalada ku saabsan hawshooda ama shaqadooda.
2. Waajibaadka ku xusan faqrada kore ma gaarsiisna dokumentiyada iyo qoraalada ay hayaan

qareenada, wakiilada, la taliyeyaasha khuburada, notaayooyinka, dhakhaatiirta, bishardi in dokumentiyadaas ama qoraaladaas ay yihiin kuwa la xiriira arrimo, si waafaqsan qawaaniinka habraaca xeerka ciqaabta, ay shakhsiyaadkaasi xaq u leeyihiin in aysan markhaati ka gelin.

3. Nootaayooyinku waxaa markasta waajib ku ah in ay soo bandhigaan dokumentiyada guud (atti pubblici) iyo qoraalada khaaska ah (scritture private) ee ay tastiiqeen, marka laga reebo dokumentiyada ay ku qabteen dardaarannada xogta ah iyo caddeymaha qabashada dardaarannada gacan-qoraalka ah.

4. Xuquuqda baarista iyo hubinta waa xad-la'aan waxaana qayb kah, kumana koobna, buugaagta iyo diiwaannada, guud ahaan dokumentiyada ay ku waajibtay canshuurta moorka, iyo sidoo kale dokumenti kasta oo qoraal ah oo xafiiska yaala ama yaala goobta ay ka socoto hawsha ganacsiga, qofka baaritaanku quseeyana uma laha ikhtiyaar in uu xusho waraaqaha iyo dokumentiyada ay tahay in la baaro.

### Qod. 37
### Dokumentiyada Gundhig-qoraalka

1. Xadgudubyada waxaa lagu sugayaa hab gundhig qoraal waana in ay ku lifaaqan yihiin dokumentiyada, qoraallada iyo diiwaannada caddeynaaya xadgudubyadaas.

2. Haddii, sabab kasta oo jirta, aysan suuragal ahayn in dokumentiyada, qoraallada iyo diiwaannada lagu lifaaqo gundhig qoraalka waa in la tilmaamo marxalladaas.

### Qod. 38
### Ikhtiyaarka Canshuur Bixiyaha ee Haysashada Dokumentiyada

1. Qofkii raba in uu haysto dokumentiyada, buugaagta iyo diiwaannada ay tahay in lagu lifaaqo gundhigga baarista waa in uu dhigaa xafiiska canshuuraha dadban ee ganacsiga lacag u dhiganta caddadka canshuurta iyo qaybta ugu yar e ganaaxa sharcigu u dejiyey xadgudubka la xiriira dokumenti kasta oo la reebtay.
2. Xafiiska baarista wuxuu ku caddeynayaa gundhigga qoraalka, xataa loo baahdo in la furo dokumentiga, dibaajiga la bixiyey.
3. Canshuurbixiyuhu waa in uu u kaydiyaa ayagoo aan wax laga bedelin una geeyaa qaybaha ku shaqada leh ama hay'adaha garsoorka markii ay dalbadaan, dokumentiyada, qoraalada iyo diiwaannada uu reebtay si waafaqsan faqradaha kore. Haddii uusan keenin ama keeno ayaagoo wax ka bedelan, canshuurbixiyaha waxaa lagu qaadayaa ganaax ugu yaraan Sh.So. 50 ilaa Sh.So. 500, marka laga reebok u qaadista qodobada Xeerka Ciqaabta, haddii ficilka dambi dhashay.

## CINWAANKA 4AAD
Qodobo ku Meel Gaar ah iyo kuo Dhameystir ah

### Qod. 39
### Iibinta Canshuuraha Moorka iyo Khidmadda Iibinta

1. Ka iibinta dadweynaha ee canshuuraha moorka waxaa sameyn kara oo kaliya shakhsiyaadka

qof ama qaynuuniga ah iyo xafiisyada ay Wasaaradda Lacagtu xeer ugu ogolaatay. Kuwaasi waxay xaq u leeyihiin khidmadda caddadkeedu yahay sida soo socota:

a) Iibsheyaal aan qayb ka ahayn maamullada Qaranka Sh.So. 2%
b) Iibsheyaal qayb ka ah maamullada Qaranka Sh.So. 0.50%

2. Shakhsiyaadka loo ogolaaday in ay dadweynaha ka iibiyaan canshuurta moorka waa in ay si joogta ah u hayaan kaydadka lagu dejiyey xeerkaan ogolaanshaha waana in ay si dhameystiran u haqabtiraan, daahid la’aan, intii kaydku dabooli karo, dalabaadka iibsiga canshuuraha moorka. Haddii ay dhacdo ku xadgudub amarkaas waxaa la dhaqangelinayaa ganaaxa guud ee ku tilmaaman qodobka 30 ee xeerkaan.

3. Xafiisyada ku shaqada leh waxay u fasax yihiin in ay canshuurta iibshayaashu soo shubaan uga jaraan khidmadda lacag qabashada, ayagoo bixinaaya rasiid ay tahay in lagu lifaaqo xisaabxirka bil-laha ah.

**Qod. 40**
**Buuxinta Canshuuraha Moorka ee Hadda Jira**

Xaashida mooreysan, marka laga reebo kambiyaalayaasha, iyo weliba foomamka diiwaannada aan si caadi ahayn canshuur moor loo saaray ee taariikhda xeerkaan dhaqan galo ay dhamaan baalashoodu cad yihiin ama haddii la isticmaalay leh xaashiyo aan la isticmaalin waa la buuxin karaa, 30 maalin gudahood, ilaa in le’eg dhameystirka canshuurta waajib ka ah ee ku tilmaaman qodobada 6 iyo 7, ayadoo dhinacyadu ay saarayaan ayna tirtirayaan canshuuro moor.

**Qod. 41**
**Wakhti Dhac Xuquuq (Prescrizione)**

1. Xuquuqda Qaranku u leeyahay in uu qaato canshuurta moorka iyo ganaaxyada ku tilmaaman xeerkaan waxay dhacaysaa markii ay shan sano ka soo wareegto laga bilaabo maalintii ay ahayd in canshuurta la bixiyo.

2. Wakhti dhaca xuquuqda Qaranka ee qaadashada canshuurta moorka iyo ganaaxa maamul ma fasaxaayo isticmaalka iyo sameynta dokumentiyo iyo qoraallo xadgudub ku ah xeerkaan, ayadoo aan si rasmi ah loo bixin canshuurta.

**Qod. 42**
**Xog Xafiiseed**

Ciidanka Booliska Canshuuraha, saraakiisha iyo shaqaalaha ku tilmaaman qodobka 35 waa in ay ilaaliyaan xogta xafiiska wixii la xiriira nuxurka dokumentiyada ay ku baareen fulinta shaqadooda.

**Qod. 43**
**Shuruuc La Baabi’iyey**

Laga bilaabo taariikhda uu dhaqangalo xeerkaan waxaa la baabi’iyey dhammaan shuruucda la xiriirtey canshuurta moorka ee ku dhigan shuruucdaan:

a) Xeer G.G. 22/12/1938, lambar 1454; Amar 14/07/1950, lambar 38; Xeer Sharcidejin 23/03/1956, lambar 1; Sharci 22/01/1960, lambar 7; Xeer Sharci 09/09/1965, lambar 14, oo ku

saabsan ku baahinta canshuurta moorka dhamaan waddanka, oo lagu bedelay Sharci 21/11/1965, lambar 19;

b) Amar lambar 14 ee 1956, oo la xiriirta"Ajuuraddaha Maxkamadda";
c) Dhamaan shuruucda jira, ee ku saabsan ka dhaafidda canshuurta moorka iyo canshuur dhimista, ee ay dejiyeen sharciyo kale;
d) Go'aan kasta ee kale oo aan waafaqi karin xeerkaan.

**Qod. 44**
**Dhaqangelid**

Xeer Sharcidejiyehaani wuxuu dhaqangelayaa maalinta ku xigta maalinta lagu faafiyo Faafinta Rasmiga.

Xeerkaan waxaa la dhexgelin doonaa Uruurinta Rasmiga ah ee Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliya. Waxaa khasab ku tahay qof kasta oo ay waajib ku tahay in uu u hogaansamo ama ka shaqeeya in loogu hogaansamo si sharci Qaran ah.

Muqdisho, 7 Disheembar 1966.

ADEN ABDULLA OSMAN

Ra'iisalwasaare
ABDIRIZAK HAGI HUSSEIN

Wasiirka Lacagta
ALI SCEGO OMAR